



Bayaanka Guddoomiyaha Waxbarashada Guadalupe Guerrero ee Geerida Naxdinta Leh George Floyd

Maayo 28, 2020

Aad baan u murugeysanahay.

Waxaan aad uga murugeysanahay nolosha dadka Madowga ah oo wali sii socoto in ay noloshoodu ku waayaan cunsurnimo arxan darro ah iyo fashilka ku yimid in la aqoonsado bani'aadомнida aan wadaagno.

Haddii aan ahay guddoomiyaha iskuulada ugu ballaaran Oregon, waxaan aad uga xanaaqsanahay iyada oo aan aad u niyad-jabsanahay in aan ogaado sida dhibta yar ee dareen la'aanta ah ee nafta dadka madow loo goynayo. Dareenkeygu wuxuu noqday mid jahawareersan iyada oo maalin cad kamarada horteeda iyo markhaatiba.....

Waxa ay u egtahay in ayna hoos u dhacayn rabshadaha noocahani ee cunsurinimadu:

George Floyd.
Michael Brown.
Tamir Rice.
Quanice Hayes.
Aiyana Jones.
Eric Garner.
Stephon Clark.
Sandra Bland.
Kendra James.
Trayvon Martin.

Inakaga oo galayna maalmihii aan todobaadka shaqada laga nasanayey, waxa aan xasuusnaan doonaa magacyadooda iyada oo muujineyno sidii aan si firfircoon u abuuri lahayn xaaladaha sidaas darteed arday kasta oo madow oo wax ka barta PPS in la arkay, la maqlay ka dibna la taageeray.

Maalintii Tallaadadii ee aan soo dhaafnay, masiibadii aan muuqan, waxaan soo bandhignay iyada oo dib u xaqijineynay qiimaha ay bulshadeenu leedahay iyo sida ay nooga go'an tahay sinaanta jinsiyada iyo cadaalada bulshada oo ay udub dhexaad u tahay waayaha ardaydeena madow. Magaaladeena- iyo wadankeena- taariikhdu iyada ayaa qof kasta oo ka mid ah dadka midabka leh ka yeeli inuu dareemo halku dhigyo iyo ereyo maran. Aniga oo ah nin ka mid ah dadka midabka leh oo si fiican u og dareenkani, waxaa iga go'an anigaa ah hoggaamiye

waxbarasho oo ka soo horjeeda cunsuriyada midabka in aan ka shaqeyn doono sidii loo bari lahaa ardaydeena in ay noqdaan kuwa si qoto dheer u fikira, una diyaar noqda sidii ay u hoggaamin lahaayeen duni bulshadeedu cadaalad ku dhaqanto.

Dhexdhexaad kama noqon karno arrimaha cunsurinimada. Waxaan diyaar u nahay sidii aan isku garab taagi lahayn bulshadeena sidii loola dagaalami lahaa cunsurinimada ee ka soo horjeeda dadka madow.

Rabshadahani waxay argagax galinayaar ardaydeena, xubnaha qoysaskeena, macallimiinta, iyo xubnaha bulshada, iyada oo aan la wadaagayo murugada iyo xanuunka. Mar kasta, waa in aan sii adkeyno sida ay noo go'an tahay daryeelka ardaydeena madowga ah.



Guadalupe Guerrero
Superintendent